| Help if you live in a care home | GL15 Somali |
|---|---|
| **Caawimo haddii aad ku nooshahay hoy dadka lagu xannaaneeyo** | **April 2003** |

**Qoraalkani waxa uu talo assaasi ah ka bixinayaa:**

- Taageerida dakhliga la dammaanad qaaday ee Ugu-yar ee dadka ka weyn 60 sano, iyo gunooyinka kale ee laga yaabo inaad heshid.
- Sidee ayey u saameynaysaa gunooyinka aad hada qaadatid haddii aad hoy dadka lagu daryeelo aad ku nooshahay.

Haddii aad hoy xannaano lagu bixiyo ku nooshahay, ama aad mudo yar noolaaneysid, waxa aan hubinaynaa inaad heshid caawimada saxa ah, wakhtiga ugu haboon, sida ugu haboon.

Waxa kale oo laga yaabaa in qoraalkani faa'ido kuu yeesho, haddii aad daryeeshid ruux u baahan inuu ku noolaado hoy xannaaneed.

Waxa muhiima inaad baadhid wixii caawimo golaha degaankaagu laga yaabo inuu ku siiyo iyo sidaad dalab ugu samayn lahayd gunooyinka aad xaqa u leedahay ee badbaaddada bulshada.

Haddii aad hada qaadatid guno kasta, waxa **ugu muhiimsani** waa inaad ogeysiisaa xafiiska Badbaaddada bulshada inaad u guuraysid hooy xannaaneed.

*Haddii aad Scotland ku nooshahay, Waaxdaada Adeegyada Bulshada waxaa laga yaabaa in loogu yeedho Waaxda Shaqada Bulshada.*

**Taageerida dakhliga ama dakhliga la damaanad qaaday ugu yar ee dadka da'adoodu tahay 60 ama ka weyn**

- Haddii aad 16 jir ama ka weyn tahaydakhli hooseeyaana qaadatid waxa laga yaabaa inaad heshid taageereda dakhliga.
- Waaxdaada adeegyada Bulshada ayaa xisaabin doonta wixii taageerid dakhli ee aad qaadatid markay ku hawlan yihiin inta lacag ahaan ay tahay inaad bixisid.
- Kaydkaaga baanka ayaa laga yaabaa inuu saameeyo haddii, ama inta kaalmo dakhli aad heli kari lahayd. Kaydka waxa laga yaabaa iney ku jiraan guri hore aad u lahayd haddii aad u guurtay guri rasmiya, laakiin waxa jira duruufo lagu ilaabi karo tiradan.
- Haddii guuridaadu tahay mid aan rasmi ahayn sharcigu waa ka duwan yahay.
- Haddii taageerida dakhliga aad qaadaneysay ilaa 7 Abriil 2002, lacag qaadashadaada waxa laga yaabaa in qaanuunka cusubi saameeyo.

Wixii warar dheeraada, la xidhiidh xafiiskaaga badbaadada bulshada ama wac khadka warsashada gunooyinka (eeg *Kaalmo Kale* wixii warar dheeraad ah).

DWP Department for Work and Pensions

**Gunno La Joogid iyo Gunno Nolol Naafo (Attendance Allowance and Disability Living Allowance [care component])**

- Kuwani waxay caadi ahaan joogsanayaan 4 toddobaad kadib haddii
  - aad gasho guri ay maamusho golaha xaafaddaada ama
  - Waaxdaada Adeega Bulshada kaa caawiso kharashka guri madax bannaan
- Haddii Waaxda Adeega Bulshadu aanay kuu qaban qaabin hoy xannaaneed oo madax bannaan dhexdiisa markaa Gunno la Joogid (Attendance Allowance) ama Gunno Nolol Naafo (Disability Living Allowance) si caadiya ayey kuugu soconaysa, xittaa haddii aad taageero dakhli qaadatid. Qannuunkani wuu ka duwan yahay Scotland. Weydii xafiiska Gunno la Joogid ama Gunno Nolol Naafo.
- Haddi Waaxda Adeegyada Bulshadu joojiso caawimada kharashka hoyga madaxa bannaan, u sheeg xafiiska la macaamilay gunadaadii waayo si caadi ah ayaad u awoodi doontaa inaad hesho.

**Gunnada la siiyo dadka guriga ku haya qof Daryeel u baahan**

- Haddii ruux qaato Gunada la siiyo dadka guriga ku haya qof Daryeel u baahan daryeelka uu ku siiyo awgeed, way istaagaysaa haddii gunnadaada la jogid ama **xubin daryeel** ee gunno Gunnada Nolol Naafo istaago.

**Kaalmada Guryaha iyo Kaalmada cashuurta Dowladda Hoose**

- Hadaad si rasmiya ugu guurto hoy xannaaneyn leh si caadiya uma heli kartid kaalmada guryaha iyo kaalmada cashuurta Dowladda Hoose.
- Haddii aad si rasmiya u deganaanin hoy xannaana leh, waxa laga yaabaa in weli aad heshid kaalmada guryaha iyo kaalmada cashuurta Dowladda Hoose ee aqalkaaga. Arinkan kuurgal ku samee adoo warsanaya golaha degaankaaga.

**Kaalmo Kale**

- Xafiiskaaga kuugu dhow ee Badbaaddada Bulshada (social security) ama xafiiska shaqada (Jobcentre Plus) ka eeg **Shaqo Bixinta Gaarka ah (Jobcentre Plus), Badbaaddada Bulshada (social security) ama xarunta Shaqo bixinta (Jobcentre)** bandhigid xayeysiin qaybta lambarrada telefoonada ganacsiga ee buugga telefoonnada. Xafiisku waxuu awoodi doonaa inuu diyaariyo sidii uu talo kuugu siin lahaa luqaddaada, wicitaankaaga waxaa looga jawaabi doona afka ingiriisiga.
- Adeeg tilifoon oo qarsoodiya ayaa u diyaara dadka naafada ah, cida ka wakiilka ah iyo daryeelayaashooda. Waa khadka warsiga **(Benefit Enquiry Line, BEL)** tilifoonka **0800 88 22 00** (Af ingiriisi ayaa lagguugu jawaabayaa) dadka hadalka iyo maqalku ku dhib yahay waxay isticmaalayaan textphone iyagoo wacaya **0800 24 33 55.**

Waxaad ka heli kartaa Waaxda Shaqada iyo Howlgabka (DWP) warar dheeraada adigoo booqda bogga Internetka oo ah: **www.dwp.gov.uk**

Xassuusnow in qoraalkani yahay hage guud ee lacago kaalmo oo aanu ahayn warbixin awood xukun ee sharciga oo dhammeystiran. Waxaanu samaynay si walba oo suuro gal ah in warbixinta ku qoran buug yarahan ay noqoto mid sax ah taariikhda ku qoran xagga hore. Si kabasta ha ahaatee isbedel ku yimaada sharciga ayaa ka dhigi kara buugyarahan mid si tartiib tartiiba u noqda warbixin aan sax ahayn.